



## Ururka Farshaxaniinta ayaa abaalmarisay 4 macalin oo PPS ah

Macalinka farshaxanka Dugsiga Sare ee Lincoln Addy Kessler ayaa og ahmiyada abaalmarinta macallinnimada halkii mar ay wakhti la qaadato ardaydeeda.

“Aad ayey u xiiso badan tahay markay ogaadaan habab cusub oo wax loo qabto, markay dhahaan, ‘Allaylehe!’ ayay tiri. “Waa tan ugu fiican.”

Kessler iyo and saddex kamid ah barayaasha kasocota Dugsiyada Dadweynaha ee Portland ayaa lagu abaalmarisay intii mar ay dadkii ka yeersiyeen *allaylehe*, ayagoo ku guuleystay afar kamid ah toddobada abaalmarin lagu bixiyay shirkii Ururka Waxbarashada Farshaxanka ee Oregon oo lagu qabtay Rockaway Beach.

Macallimiinta farshaxanka ayaa asxaabtooda u soo xushay abaalmarinnada, xubnaha guddiga OAEA waxay go'aamiyeen kuwa ku guuleysta iyagoo qiimeynayaa astaamohooda sida barayaasha farshaxanka iyo ka qeyb qaadashadooda iyo sida ay ugu dadaalayaan ardayda, dugsiyada iyo bulshada.

Kessler ayaa ku guuleystay abaalmarinta ugu sarreysay, Abaalmarinta Farshaxanka Sanadka ee Oregon. Waxaa ku soo biirey guuleystayaasha PPS:

- **Nicole Penoncello**, Dugsiga Hoose ee Buckman, Baraha Farshaxanka Dugsiga Hoose ee Sanadka
- **Lilly Windle**, Lincoln High School, Lataliyaha Ururka Abaalmarinta Farshaxanka ee Sanadka
- **Carolyn Hazel Drake**, Waaxda Muuqaalka Degmada & Bandhigga Farshaxanka, Adeegga Xushmad leh ee Abaalmarinta Xirfadeed (VAPA)

Kessler waxay noqotay macalinka labaad ee kasocota PPS oo si xiriir ah ku guulaystaa abaalmarinta ugu sarreysa, ayadoo ku guulaystay sannad kadib markay Randy Maves macalinka Dugsiga Sare ee Madison la abaalmarisay. Sida Maves oo kale, oo ah macalinka nashqadeynta sawirka, waxbarista Kessler wuxuu ka koobanyahay qurxinta farshaxanka dhaqameed iyo barnamijiyada dhabta ee dunida oo leh habka Waxbarashada Farsamada iyo Xirfada (Career and Technical Education (CTE)).

Kessler, oo shan sanno joogta Lincoln waxayna hadda sannadka 10aad ku gashay macallinnimo, waxay dhigtaa Naqshada Farshaxanka ee CTE, taasoo ardayda tuusisaa hababka iyo agaabyada loo adeegsado si loo abuurdo qaybaha shaqeynaya oo leh muuqaal qurxoona. Waxyaabaha ay ardaygeeda bartaan in ay sameeyaan waxaa kamid ah leebiska, dharka, nalalka, naqshadaha gudaha, kabaha, bandhigyada tafaariiqda iyo naqshadaha dhismayaasha, kuwaasoo ay gebbi ahaan yihiin xirfadaha mustaqbalka.

“Mararka qaar waxyaabahan oo kale ayaan loo qaadanayn in ay yihiin xirfad lagu shaqaysto, laakin asal ahaan deegaankeena oo idil waa mida ay ku dhisantahay, xitaa marka la eego muuqaalka dhulka.

Barnamijka Kessler aad ayay muhiim u noqotay, waxay ku khasbanatay in ay joojiso waxbarista farshaxanka dhoobada, taasoo ay kujirtay intii ay xirfadeeda macallinnimo ku shaqeeynaysay.

Kessler, sida barayaasha kale ee farshaxanka PPS, waxay wali tahay farshaxaniistaha firfircoon. Waxay naqshadeysaa waxayna samaysaa dharka, waxayna lahaan jirtay shirkad sameeya boorsooyinka gacanta lagu qaato.

Drake, iyo Kristen Brayson oo ah asxaab ay wada shaqeeyaan oo helay abaalmarinta VAPA (guuleystaha Adeegga Xushmad leh ee Abaalmarinta Xirfadeed sannadki hore) waxay sameeyeen PPS [Master Arts Education Program](#) (Barnamijka Waxbarashada Farshaxanka ee Master-ka), waxay leedahay [full portfolio of pieces](#) (qaybaha faylalka waraqadaha oo dhammaystiran), oo ay badana ka samayso agaabyada dhaqameed oo la heli karaa sida galaasyada dhoobada ka samaysan, dhar iyo dunta.

Penoncello, oo ay kujirta sannadkeeda saddexaad ee Buckman (dugsi diirada saara fursadaha farshaxanka) iyo sannadkeeda toddobaad ay kujirta PPS, waxay dib u milicsanaysaa xiisaha ay u qabto khariidadaha iyo kaartoogaraafiyada ee qaybaha oo kujira [several mediums](#) (gudbinta kaladuwan).

Windle, oo wax ka baratay Lincoln tan ilaa 2002 waxayna hadda dhigtaa naqshadeynta sawirka iyo sawir qaadista nooca dhijitaalka ah, ayada iyo carruurteeda ayaa farshaxanka ka shaqeeya, kuwaasoo ah ardayda PPS, waxayna sanado badan ka shaqeyneysey aqoon-isweydaarsiga carruurta iyo dadka waaweyn.

Waxaan umahadcelinaynaa barayaasheena farshaxanka, kuwaasoo farshaxanka ka dhiga mid firfircoon oo muhiim u ah Dugsiyada Dadweynaha ee Portland.